



REPUBLIC OF

SOMALILAND

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-2296/032014

20/03/14

**XEER MADAXWEYNE Lr: 0378/032014**

**Aasaasidda Guddida Hoggaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka iyo Guddi  
Hawleedkeeda**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad iyo Qodobka 94aad Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 3aad ee Xeerka jinsiyadda, Xeer Lr. 22/2002 oo  
waajibinaya in muwaadiniintu helaan aqoonsiga  
muwaadinimo;
- Markuu La Tixgeliyey: Siyaasadda Golaha Wasiirradu ansixiyeen ee ay ku  
go'aamiyeen in la sameeyo Diiwaangelinta muwaadinka;
- Markuu Arkay: Baahida loo qabo in la helo Diiwaangelinta muwaadinka  
oo laga sameeyo Dalka oo dhan si loo helo xog sugan;
- Markuu Yaqiinsaday: In Diiwaangelinta Muwaadinka ay udub-dhexaad u tahay  
isla markaana fudaysinayso in la helo diiwaangelinta  
codbixiyaha oo gogol xadhaysa in la helo doorasho xor  
oo xalaal ah;
- Markuu Xaqiiqsaday: In ay tahay daruuri in la sugo muwaadiniinta reer  
Somaliland si loo xaqiijiyo in ay codeeyaan  
muwaadiniinta oo keliya;
- Markuu Garwaaqsaday: In la dardar-geliyo loona qabto hawsha diiwaangelinta  
Muwaadinka si dhaqso ah;
- Isagoo Maanta ku Haya: Ahmiyadda doorashooyinku ku leeyihiin Qaranka iyo  
sidii ay u dhici lahayd doorasho xor oo xalaal ah;

Wuxuu halkan ku soo saaray Xeerkan;

**Qodobka 1aad: Aasaaska Guddida Hoggaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka**

Waxaa xeerkan lagu aasaasay Guddiyada soo socda:

Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka (Steering Committee) oo ka kooban:

1. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Guddoomiye.
2. Wasiirka Wasaaradda Madaxtooyada, Xubin.
3. Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, Xubin.
4. Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare, Xubin.
5. Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, Xubin.
6. Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta, Xubin.
7. Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta Qaranka, Xubin.

### **Qodobka 2aad: Ujeeddada Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka**

Ujeeddada Guddida Hogaamintu waa hogaaminta iyo ka midho dhalinta habka diiwaangelinta muwaadinka.

### **Qodobka 3aad: Xilka iyo Waajibaadka Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka**

Xilka iyo Waajibaadka Guddida Hogaamintu waa:

1. Dejinta iyo xaqiijinta qorshayaasha Diiwaangelinta Muwaadinka
2. Ansixinta qorshaha diiwaangelinta.
3. Hagidda iyo daba-galka guddi hawleedka lagu aasaasay Qodobka 1aad ee xeerkan.
4. Ka-talo bixinta caqabadaha laga yaabo in ay soo food-saarto hawsha diiwaangelinta.
5. Ka-talo bixinta soo saarista Xeerarka, Wareegtooyinka iyo amarrada lagama maarmaanka u ah meel marinta diiwaangelinta.

### **Qodobka 4aad: Aasaaska Guddi Hawleedka Diiwaangelinta Muwaadinka**

Guddi Hawleedka Diiwaangelinta Muwaadinka (Task Force) oo ka kooban:

1. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Guddoomiye.
2. Mareeyaha ICT Commission, Xubin.
3. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Madaxtooyada, Xubin.
4. Agaasimaha Guud ee Hay'adda Maamul Wanaaga, Xubin.
5. Garyaqaanka Guud ee Qaranka, Xubin.
6. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Warfaafinta, Xubin
7. Dr. Maxamed Cabdi Daa'uud, Xubin.

### **Qodobka 5aad: Ujeeddada Guddi Hawleedka**

Ujeeddada Guddi Hawleedku waa meel marinta siyaasada iyo ka midho dhalinta qorshayaasha Guddida Hogaaminta.

### **Qodobka 6aad: Xilka iyo Waajibaadka Guddi Hawleedka**

Xilka iyo waajibaadka Guddi Hawleedku waa:

1. Fulinta siyaasadda iyo qorshayaasha Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka.
2. Fulinta hawl-maalmeedka Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka.
3. La socodsiinta iyo uga warbixinta Guddida Hoggaaminta Diiwaangelinta habka ay u socoto Diiwaangelintu.
4. La socodsiinta iyo uga warbixinta Guddida Hogaaminta Diiwaangelinta Muwaadinka caqabadaha farsamo ee soo foodsaari kara hawsha diiwaangelinta iyo soo jeedinta talooyinkooda la xidhiidha caqabadahaa.

### **Qodobka 7aad: Xarunta Guddiyada**

Labada Guddi waxay ku hawlgalayaan Xarunta Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo udub-dhexaad u ah hawsha diiwaangelinta.

### **Qodobka 8aad: Dhawrida Xilliga iyo Nidaamka**

Guddiyada waxaa la farayaa in hawsha lagu qabto wakhtiga loo qorsheeyey lana raaco Nidaamka Guddida Qandaraasyada Qaranka iyadoo la dhawrayo hanaanka iyo habsami u socodka shaqada.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland